(Somali)

**Norsk Kvalitetsregister Øre-Nese-Hals, Hørselsregisteret for barn**

# Warbixin ka timid Diiwaanka maqalka ee carruurta

**Hordhac**
Diiwaanka maqalka ee carruurtu wuxuu diiwaan geliyaa carruurta tijaabadii maqalkooda laga qaaday markii ay dhasheen ay ahayd mid aan la aqoonsan, ama carruur u dhexeeya 0-18 sano oo lagu sheegay maqal-la'aan waareysa. Maqal-la'aanta waaraysa waxyeellooyin waaweyn ayay carruurta u keeni kartaa, haddii aysan caawin helinna waxay ilmuhu halis ugu jiraan inay facooda caadiga wax u maqla dib uga dhacaan dhinacyada luuqadda iyo hadalka, garaadka, akhriska- iyo qorista iyo horummarka dareen-bulsho. Ururinta iyo qiimaynta macluumaadka ayaa lagu helayaa aqoon ku saabsan waxyaalaha saameeya maqalka, luuqadda iyo xaaladda nafsiyanka bulshada dhexdeeda ee carruurta ay maqal-la'aantoodu waarayso.

**Hadafka**
Hadafka laga leeyahay diiwaanka waa in ay bukaanka oo dhan helaan daaweyn ku habboon oo ammaan ah oo taas tayadeeda la hubiyo – iyo in sare loo qaado aqoonta ay bukaanku, koox ahaan iyo keli ahaanba, u leeyihiin daaweyntan. Diiwaanku wuxuu gacan ka geysan karaa sidii daaweynta sare loogu qaadi lahaa oo laysugu duwi lahaa, oo sidoo kale loo xoojin lahaa xiisaha iyo cilmibaarista maaddadan iyo weliba wacyigelinta dadweynaha.

**Maxaa la diiwaangelinayaa?**
Macluumaadka la diiwaangelinayo waa sanadka dhalashada, goobta degaanka, baaritaanka iyo daaweynta, cudurrada lagu sheegay ee aan ahayn maqal-la'aanta iyo warbixinnada ay waalidku ilmaha ka soo gudbiyeen.

Sharraxaadda diiwaanka ka eeg bogga internetka ee https://horselsregisteret.no

**Xaggee ayaa warbixinta laga soo qaadanayaa?**
Macluumaadka ilmaha waxaa laga soo qaataa shaqaalaha caafimaadka ee u gudbiya iyo marka ay tagaan qaybta ØNH kaddib marka tijaabadii maqalka ee markii ilmuhu dhashay ay noqoto mid aan la aqoonsan, ama marka lagu sheego maqal-la'aan waareysa iyo koontaroollada ilmaha lagula soconayo da'da 3, 6, 10 iyo 15 jirka. Ilmaha ay maqal-la'aantoodu tahay mid waarayesa, waalidka ayaa foom su'aalo oo elegtaroonik ah koontaroolka hortiis loo sii dirayaa si ay u soo gudbiyaan macluumaadka ilmaha.

**Xaqa loo leeyahay in la arko, wax laga beddelo iyo in qofka laga daayo gelinta diiwaanka**
Sida uu dhigayo xeerka diiwaanka caafimaadka §§ 24-25 waxaad markii aad doonto dalban kartaa inaad aragto macluumaadka ilmaha laga diiwaangeliyay, ama dalbi kartaa macluumaadka in la saxo ama la tirtiro. Waxaad xaq u leedahay inaad dalbato in aan ilmaha lagu darin diiwaanka oo aan macluumaadka qofeed- iyo kuwa caafimaadka ee ilmaha lagu sii isticmaalin Diiwaanka maqalka ee carruurta. Haddii aadan doonayn in macluumaadka ilmaha la kaydiyo, markii aad doonto ayaad dalban kartaa in taas laga daayo adiga oo aan wax sabab ah lagaaga baahnayn. Daaweynta ilmaha wax saamayn ah ku yeelan mayso haddii aad doorato in aan diiwaanka la gelin ama haddii aad doonayso in diiwaanka laga saaro. Waa la tirtirayaa warbixinnada ilmaha ku saabsan ee diiwaanka ku jira. Isbataalka St. Olavs oo mas'uul ka ah macluumaadka la soo aruuriyay ayaa weli macluumaadka sii maaraynaya marka ay taasi muhiim u tahay sidii uu isbataalku uga soo bixi lahaa waajibka ka saaran in aan diiwaanka mar kale lagu soo darin dad codsaday in laga reebo. Faylalka cilmibaarista ee uu qarsoon yahay qofka macluumaadka bixiyay ee cilmibaarista loo isticmaalay la tirtiri maayo marka macluumaadka la tirtirayo.

Boggaan ayaad ku dalban kartaa in aan ilmaha diiwaanka lagu darin www.helsenorge.no, ku sheegi kartaa marka aad tageyso qaybta ØNH ama kula xiriiri kartaa Diiwaanka maqalka ee carruurta. Hagista xaqa aad u leedahay in warbixin lagu siiyo, arkidda, tirtiridda iyo in aan macluumaadkaaga la diiwaangelin waxaad ka helaysaa https://tjenester.helsenorge.no/helseregistre iyo bogga internetka ee https://horselsregisteret.no

Haddii aad dareento macluumaadkaaga in aan loo maaraynin si waafaqsan xeer-hoosaadka diiwaanka tayada caafimaadka ama xeer kale oo arrintan khuseeya, waxaad la xiriiri kartaa Hay'adda kormeerka macluumaadka [Datatilsynet] ama Hay'adda kormeerka caafimaadka ee qaranka [Statens Helsetilsyn].

**Shuruucda iyo xeerarka**
Diiwaanka maqalka carruurtu wuxuu hoos tagaa xeer-hoosaadka diiwaanka tayada caafimaadka, xeerka diiwaanka caafimaadka iyo nidaamka ilaalinta macluumaadka qofka. Wuxuu diiwaanku daryeelaa hawlaha danta guud ah, kuwaas oo sharci ahaan ku salaysan nidaamka ilaalinta macluumaadka qofka qodobka 6aad lambarka 1aad xarafka e

**Norsk Kvalitetsregister Øre-Nese-Hals, Hørselsregisteret for barn**

iyo qodobka 9aad lambarka 2aad xarfaha g, h, i iyo j. Xeerka diiwaanka caafimaadka iyo xeer-hoosaadka diiwaanka tayada caafimaadka waa xaq dheeri ah oo la socda xaqa qaranka. Macluumaadka xiriirka uu ilmuhu la leeyahay hay'adaha caafimaadka ee takhasuska leh ayada oo aan la oggolaan ayaa la soo qaadan karaa oo la isticmaali karaa, laakiin waxaad xaq u leedihiin in warbixin la idin siiyo – waxaa kale oo aad xaq u leedihiin in aad iska reebtaan in uu diiwaanku sii maareeyo macluumaadka ilmaha. Macluumaadka diiwaanka ku jira waxaa la haynayaa ilaa iyo inta ay jirto sabab uu diiwaanku macluumaadka u isticmaalo taas oo ku salaysan nidmaanka ilaalinta macluumaadka qofka ee qodobka 6aad lambarka 1aad xafarka e iyo xeer-hoosaaka diiwaanka tayada caafimaadka, iyo ilaa iyo inta loo baahan yahay oo ay taasi lagama maarmaan u tahay hadafka daaweynta.

Macluumaadka elektaroonik ahaan ayaa loo diiwaangeliyaa, mana arki karaan dad aan shaqo ku lahayn. Macluumaadka oo dhan waxaa la xafidayaa ayada oo la tixgelinayo ilaalinta macluumaadka qofka iyo xaqa nolosha khaaska ah ee qofka kuwaas oo waafaqsan xeerarka iyo xeer-hoosaadyada.

**Maaraynta macluumaadka diiwaanka**
Macluumaadka waxaa diiwaanka loogu kaydiyaa hab aan laga garan karin qofka bixiyay, halkaas oo lambar-sireed lagu beddelo lambarka dhalashada qofka. Waajib xog qarin ayaa saaran dhammaan dadka og macluumaadka diiwaanka ku jira. Macluumaadkaaga qof ahaaneed na waxaa la bixin karaa ama si kale loo fidin karaa keliya marka ay taasi u dhacayso si waafaqsan xeerarka iyo xeer-hoosaadyada – sida tusaale ahaan xeerarka waajibka xog qarinta iyo nidaamka ilaalinta macluumaadka qofka ee Yurub. Macluumaadka diiwaanka waa loo isticmaali karaa maammulka adeegga caafimaadka, sare u qaadidda tayada daaweynta iyo cilmibaarista.

Macluumaadka diiwaanka bukaanka ayaa la soo qaadan karaa si loo ogaado tafaasiisha cudur-aqoonsiga iyo daaweeynta la bixiyay. Waxaa kale oo uu diiwaanku soo qaadan karaa oo is barbardhigi karaa macluumaadka kale ee arrinta khuseeya ee ku jira diiwaannada tayada caafimaadka ee qaranka iyo diiwaannada caafimaadka ee ku dhisan xeerka diiwaanka caafimaadka § 8 ilaa §11, ayada oo kuwaas loo eegayo macluumaadka Diiwaanka dad dhigista iyo macluumaadka dhaqan-dhaqaale ee diiwaannada dadweynaha ee kale. Diiwaannada dadweynaha iyo baaritaannada dadweyanaha waxaa ka mid ah: Diiwaanka bukaanka Norwiijiga, Diiwaanka dhalashada, Diiwaanka tayada ee daawada dhallaanka ee Norway, Diiwaanka waraaqaha daawada, Diiwaanka kansarka, Diiwaanka sababta geerida, Diiwaanka Xarunta dhexe ee Tirakoobka, FD Trygd, NAV, Diiwaannada Agaasinka laanta canshuuraha, baaritaannada dadweynaha ee ku jira Conor, qaybaha diiwaannada ee arrintan khuseeya ee ØNH, Baaritaannada caafimaadka ee Qaranka, Baaritaanka Tromsø, HUNT iyo KUHR (Koontaroolka iyo bixinta kharash caafimaad oo qofka loo celinayo). Si joogto ah ayaan u hubinnaa inay sax yihiin macluumaadka ku jira diiwaanka qumanka – taas oo aan hubinno annaga oo barbardhigayna Diiwaanka bukaanka Norwiijiga. Waxaan eegnaa in tirada bukaanka la diiwaangeliyay ay tahay tiradii saxda ahayd.

Wadashaqayn ayaa lala leeyahay diiwaannada maqalka carruurta ee waddammada waqooyiga ee kale. Waxaa lagu tala jiraa in si joogto ah is-barbardhig loogu sameeyo macluumaad la qariyay dadka bixiyay, iyo in la billaabo cilmibaaris heer caalami ah oo ku salaysan diiwaannada kala duwan. Waxaa sidoo kale la idinku casumi karaa mashruucyo cilmibaaris oo khaas ah oo hoos imaanaya hadafka diiwaanka.

Mar kasta oo macluumaadka la is-barbardhigayo waa inay taas horey u sii oggolaadaan hay'adaha dawliga ah ee la aqoonsan yahay. Natiijooyinka ka soo baxa dhiraandhirinta macluumaadka diiwaanka ku jira ma laga garan karo qofkii gaarka ahaa ee macluumaadka bixiyay.

Warbixin sanadle ah ayaa diiwaanka laga soo saari doonaa, halkaas oo ay dadweynuhu macluumaadka ku arki karaan bogogga internetka ee hoos ku xusan. Natiijooyinka waxaa si joogto ah loogu daabici doonaa kulan-xarfadeedyada, iyo wargeys-xilliyeedyada caafimaadka ee qaranka iyo kuwa caalamiga ah.

Warbixin dheeraad ah oo diiwaanka ku saabsan waxaad ka helaysaa: www.kvalitetsregistre.no og https://horselsregisteret.no

**Iimayl:** horselsregisteret@stolav.no

**Isu-duwaha diiwaanka:**
Ann Helen Nilsen

**Maammulaha cilmiga:**
Tone Stokkereit Mattsson

Postadresse: Norsk Kvalitetsregister Øre-Nese-Hals, Hørselsregisteret for barn, St. Olavs hospital HF,
Seksjon for medisinske kvalitetsregistre, Postboks 3250, Torgarden, 7006 Trondheim
Epost: post@stolav.no Hjemmeside: www.stolav.no Telefon sentralbord 72 57 30 00, fra utland +47 815 55 850, Org.nr.: 883 974 832